



BARNAAMIJKA JAAJAREYNTA BAABUURKA KORONTADA (EV) EE QOYSASKA BADAN

Ka Dhig Gurigaaga EV Mid U Diyaarsan Caawinaad Khabiir Iyo Dhiirigeliino leh

Miyaad raadinaysaa inaad ku rakibto baabuurka korontada (EV) guryahaaga qoysaska badan? Seattle City Light waxay kaa caawin kartaa inaad qorsheysato xalalka buuxinta baatariga Baabuurka Korontada (EV) iyadoo lala kaashanayo talo khabiir ka socota la-taliyeyaal la aamini karo waxayna sidoo kale ay bixisaa dhimis cusub si loo dhimo kharashka mashruucaaga buuxinta baatariga Baabuurta Korontada (EV) markaad diyaar u tahay inaad rakibto.*

Maalin kasta, darawalo aad iyo aad u badan ayaa ka fikiraya Baabuurka Korontada (EV) waxayna raadinayaan ikhtiyaar buuxin baatari oo habboon. Markaa, macno ayay samaynaysaa inaad ka fikirto cusboonaysiinta gurigaaga qoysaska badan si aad ugu diyaariso darawalada Baabuurka Korontada (EV) ee maanta iyo dadka deegaanka ee ay u badan tahay inay mustaqbalka wadi doonaan Baabuurta Korontada (EV). City Light waxay halkan u joogtaa inay ku caawiso markaad diyaar u tahay inaad qaado talaabada ugu horeysa. Kooxdeena ee la-taliyeyaasha la aamini karo waxay bixiyaan **talooyin bilaash ah oo aan eex lahayn** si ay kaaga caawiyaan inaad samayso ikhtiyaaro xog ogaal ah oo ku saabsan baahiyaha gurigaaga. Haddi aad maamusho guri dabaqyo ah ama guryaha is-kaashatada, guryaha la awoodi karo ama qiimaha suuqa, waxaanu kaa caawin karnaa inaad abuurto wado xog ogaal ah oo aad kusoo rakibanayso buuxinada baatariga Baabuurka Korontada (EV).

Faa'iidooyinka Rakibaadda buuxinada baatariga Baabuurka Korontada (EV)

- Waxay taageertaa dadka deegaanka ee kaxeeya gawaarida korontada (EV) ama ku fikiraya inay kaxeeyaan Baabuurka korontada (EV).
- Waxay xoojisaa helitaanka buuxinta baatariga Baabuurka Korontada (EV) ee bulshada dhexdeeda.
- Waxay soo jiidataa deganeyaalka cusub oo wadata adeeg casri ah.
- Waxay si badbaado leh u cusboonaysiisaa kaabayaashaada korontada.
- Waxay taageertaa gaadiid nadiif ah.
- Waxay hagaajisaa tayada hawada oo ay yareysaa sii deynada gaaska qorfeyska.



Ku hel Qiimaynta Buuxinta Baatariga Baabuurta Korontada (EV) oo Dhamaystiran Afar Tallaabo oo Fudud






1. Nala soo xidhiidh si **laguugu xidho la taliye khabiir buuxinta baatariga Baabuurka Korontada (EV).**
2. **Dib ula eeg gurigaaga** khabiir warshadaha ah.
3. **Kala hadal talooyinka la gaaryeelay ee ku saabsan** xalalka buuxinada baatariga ee Baabuurka Korontada (EV).
4. **Hel caawimo helitaanka dhiirigelinta City Light** si loo yareeyo kharashyada rakibaadda kaabayaasha Baabuurka Korontada (EV).

*Guryaha qoysaska badan ahi waa inay lahaadaan ugu yaraan shan unugyo si ay uga qaybqaataan Barnaamijka Jaajareynta Baabuurka Korontada (EV) ee Qoysaska Badan.





BARNAAMIJKA JAAJAREYNTA BAABUURTA KORONTADA (EV) EE DHIIROGELIINADA BADAN

Barnaamijka Jaajareynta Baabuurta Korontada (ev) ee Dhiiro-geliinada Badan – Maxaa Lagu Daraa?	Kaabayaasha-Mitirka-ka Ah			Kaabayaasha-Mitirka-ka Ah Gadaashooda	Qalabka Macaamiilka
	 Shabakadda Qaybinta Adeegyada Ay Dayactirto City Light	 Transformer-ka Suufka ku Rakiban ee Qalabka Korantada Ay Dayactirto City Light	 Halbeeg dhirir Ay Dayactirto City Light	 Baal Ay Dayactirto City Light	 Jaajarka Baabuurta Korontada (EV) Ay Leedahay Macaamiilka
Hadda La Helli Karo					
Jaajarka Baabuurta Korontada (EV) -ee Keliya Loogu talagalay Dhiirogeliinada				●	●
La heli karo Hadhow 2023					
Dhiirigelinada Make-Ready	●	●	●	●	

Intaa waxaa dheer, hel adeegyada la-talinta si ay kaaga caawiyaan inaad samayso doorashooyin xog ogaal ah oo ku saabsan baahiyaha gurigaada. Nala soo xidhiidh wixii faahfaahin ah.

EV Charger-Only

EV Charger-Only wuxuu siiyaa shaqaalaha jaajarada lagu rakibay guryaha qoysaska badan. Lacagaha waxa loo isticmaali karaa in lagu dhimo kharashaadka nakhshadeynta, oggolaanshaha, gadashada, iyo rakibaadda goobooyinka (Heerka 1) iyo/ama Jaajarada Baabuurka Korontada (Heerka 2). Kharashaadka la xidhiidha sida shaqada iyo agabka sidoo kale waa la daboolaa. Qadarka maaligelinta kama dambaysta ah way kala duwanaan kartaa.

Make Ready (La heli karo Hadhow 2023)

Make Ready waxay bixisaa dhiirigelin mashaariicda u baahan kaabayaal koronto oo cusub si ay u dejiyaan jaajarada baabuurta korontada (EV) guryaha qoysaska badan. Kaabayaasha cusub waxay iskugu jiri karaan baalal, mitir, gudbiyeyaal, iyo qaybin la cusboonaysiiyay. Lacagaha waxaa loo isticmaali karaa in lagu dhimo kharashaadka mashruuca, oo ay ku jiraan shaqada iyo agabka. Qadarka maaligelinta kama dambaysta ah way kala duwanaan kartaa.



Baro wax badan oo ku saabsan sida aad hore uga rari karto gurigaaga adigoo adeegsanaya jaajarka Baabuurka Korontada (EV).

Nala soo xidhiidh wixii faahfaahin ah ee ku saabsan u-qalmitaanka dhiirigelinta iyo qiimayn iyo falanqayn bilaash ah.

ICF MFEV_Flyer041323

